

100% Bilaash, 100% Xalaal, 100% Soomaali.

*Tarjumaaddii: Maxamuud Maxamed Cabdi (1985) iyo kuwo kale.
Farsamadii, dib-u-qoristii iyo habeyntii: Eng S Jama.*

Fadlan, ogow tafsiiirkani waa tarjumaad guud, si ardeyda iwm ay u fahmaan macnaha Quraanka Kariimka ah.
*Wixii faah-faahin dheeraad ah, sharraxaad badan ama faallo gaar ah u sii baahan, fadlan, la kaasho
khubarada/culimada tafsiiirka Quraanka ku takhasustay.*

--- *** ---

066: **Suurat At-Taxriim**

Magaca Eebbe yaan ku bilaabaynaa ee Naxariis guud iyo Naxariis gaar ahba naxariista.

1. Nebiyoow maxaad u xarrimi wax Eebbe kuu xalaaleeyey, si aad u raalli geliso haweenkaaga? Eebbe waa Dembi-dhaafe, Naxariiste ah.
2. Eebbe waa idiin caddeeyey waxa dhaartiinnu ku xalaaloobi. Eebbena waa Gargaarihiinna, waana Wax-Walba-Oge, Fal-San.
3. Ma xusuusan waqtigii Nebigu ku qarsaday haweenkiisa qaarkood hadal, markaas ay ka warrantay xaalkii. Eebbana uu Nebiga u daahiriyeey. Markaas Nebigu uu ogeysiyeey qaarkiis (haweeneydii), qaarna uu ka dhaafay. Markuu u warramay ay tidhi: "Yaa kuu sheegay xaalkan?" Kuna yidhi: "Waxaa ii warramay Eebbaha Wax-Walba-Oge ah, ee Yaqaanna".
4. Haddaad Eebbe u noqotaan, inkastoo qalbigiinnu iishay, Eebbe wuu idiin dhaafi. Haddaadse isu kaalmaysataan Nebiga (dhibkiisa) waxaa u gargaari Eebbe, Jibriil iyo kuwa suubban ee Muu'miniinta ah. Malaa'iigta (kalena) markaas ka dib ayey xoojin.
5. Wuxuu Eebbe u dhow yahay, haddii uu Nebigu idin furo (haweenka Nebiga qaarkood), in uu idiinku beddelo kuwo (haween) idin ka kheyd roon oo ah Muslimiin, Muu'miniin ah; addeeca Eebbe, toobbad keena, Eebbe caabbuda, soomana - kuwo horay loo guursaday iyo kuwo aan hadda ka hor la guursanba leh.

Aayadahani waxay ku soo degeen mar uu Nebigu (naxariis iyo nabadgelyo korkiis Eebbe ha yeelee) caano ama malab uu ka soo dhadhamiyey guri haweeneydiis. Markaas uu kuwa (haweenka) kale qalbigooda wax galay.

Eebbana Isagaa wax xalaaleeya, waxna xarrima. Sidaas daraadeed, ayuu Nebiga ugu jeediyey arrintaas.

Tan kale, waa in aan la isku kaalmaysan dhib iyo waxyeello ee la isku kaalmaystaa wanaag iyo samofal. Eebbana waa gargaaraha Rasuulkiisa iyo Muu'miniinta.

Masruuqna wuxuu yidhi: "Nebiga waxaa la faray inuu dhaartii ka kafaaro-guto".

At-Taxriim (1-5).

6. Kuwa xaqa rumeeyoow, ka dhawra naftiinna iyo ehelkiinna naar lagu shido dad iyo dhagax. Naartaas oo ay ka shaqeyaan malaa'iig adag oo daran oo aan Eebbe ku caasiyeynin wuxuu faro, falana wixii la amro.
7. Kuwa gaaloobayoow, ha cudur-daarannina maanta (Qiyaamaha). Waxaa uun la idinka abaal marin waxaad camal fali jirteen.
8. Kuwa xaqa rumeeyoow, u toobbad keena Eebbe, toobbad san. Wuxuu Eebbe u dhow yahay inuu asturo xumaantiinna, idin geliyana jannooyin ay dureerayso (qulquli) dhexdooda webiyaal; maalinta aanu Eebbe hoojineynin Nebiga iyo kuwa la jooga. Nuurkooduna wuxuu socon hortooda iyo midigtooda, iyagoo odhan, "Eebboow noo taam yeel nuurkayaga, noona dembi dhaaf, Adigaa wax walba kara e".
9. Nebiyoow la jihaad gaalada iyo munaafiqiinta, kuna adkow. Hoygooduna waa Jahannamo, meel loo ahaadana iyadaa u xun.

Dadka xaqa rumeeyey waa inay ehelkooda kheyrka faraan, si ay uga nabad galaan naar dadka iyo dhagaxa lagu huriyo, malaa'iig daranna oo amarka Eebbe fulisaana ay ka shaqayso. Si ayna u noqonin sida kuwa xaq-diidka ah ee lagu odhan: "Ha cudur daarannina maanta!"

Waana in Eebbe toobbad dhab ah loogu toobbad keeno si uu wanaag iyo dembi-dhaaf innoogu abaal mariyo maalinta Nebiga iyo intii raacday Eebbe u samo fali, illeyn wax walba Isagaa kara e. Gaalada iyo munaafiqiintana waa in lala jihaado si jidka toosan loo tuso.

Rasuulkana (naxariis iyo nabadgelyo Eebbe korkiisa ha yeelee) waxaa la warsaday Tawbadda Nasuuxa ah (toosan). Wuxuuna yidhi: "Waa in la qoomammeeyo dembiga markuu kaa dhaco. Oo aad markaas Eebbe dembi-dhaaf warsato (weydiisato). Oo aanad (dembiga) u noqonin".

At-Taxriim (6-9).

10. Eebbe wuxuu tusaale uga dhigay kuwa gaalobay haweenkii nebi Nuux iyo nebi Luud. Waxaa qabey laba addoon oo Eebbe oo suubsuubban. Markaasay khiyaameeyeen nebiyadaas. Waxbana ugama ay tarin Eebbe agtiis. Waxaana lagu odhan labadaas haweeney: "La gala naarta, kuwa gelaya".

11. Waxaa kale oo Eebbe tusaale uga dhigay kuwa rumeeyey haweeneydii Fircoon markay tidhi: "Eebboow guri agtaada iiga dhis, jannada dhexdeeda. Igana nabad geli Fircoon iyo camalkiisa. Igana nabad geli dadkaas daallimiinta ah".

12. Maryama Bintu Cimraana xusuusta ee is dhawrtay. Markaas malaggu jeebka ka afuufay, rumaysayna sharciga Eebbe iyo Kutubtiisaba. Kana mid noqotay kuwa Eebbe addeeca.

Ruux xumaanloow ah wax uma tarto la nooli dad fiican haddii aanu wax qaadaneynin, sida haweenkii nebi Nuux iyo nebi Luud iyo wixii la mid ahaa.

Sidoo kale, ruuxii wanaagsan xumaan qof kale wax ma yeesho haddii aanu ka raalli ahayn, sida haweeneydii Fircoon, Maryama Bintu Cimraan oo nebi Ciise hooyadiis ahayd - xaalkeeduna la yaab ayuu lahaa.

Waxayse ku tuseysaa in Eebbaha Bini Adamka abuuray uu siduu rabo wax u falo; sidaasna waa in la rumeeyo.

Nebiguna (naxariis iyo nabadgelyo Eebbe korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: "Waxaa kaammil noqday ragga wax badan. Haweense waxaa ka kaammil noqday Aasiyadii Fircoon, Maryama Bintu Cimraan, iyo Khadiijo Bintu Khuweylid. Fadliga Caa'isha ee haweenkana waa sida thariidka iyo cuntada kale". Bukhaari iyo Muslim.

At-Taxriim (10-12)..

065: **Suurat Adh-Dhalaq**

Magaca Eebbe yaan ku bilaabaynaa ee Naxariis guud iyo Naxariis gaar ahba naxariista.

1. Nebiyow haddaad haweenka furaysaan ciddada ku fura (daahir aan la taaban), ciddadana tiriya. Eebbana ka dhawrsada. Hana ka bixinnina (saarina) guryahooda (ay joogeen marka la furayey). Iyaguna yaanay ka bixin (yaanay ka tegin) inay xumaan cad la yimaaddaan mooyee. Taasi waa xuduuddii Eebbe. Ruuxii ka tallaaba xuduudda Eebbana naftiisa ayuu dulmiyey. Ma ogidin, wuxuu Eebbe u dhow yahay inuu ka dib xaal keeno, (jaceyl isku noqosho).

2. Markay ciddada dhamaadkeeda (ku dhowaadaan) si fiican u haysta, ama si fiican u faaruqa (fura). Dad caaddiliin ah oo idin ka mid ahna marag uga dhiga, maraggana ha u guteen Eebbe dartiis. Xaalkaasi waa wacdi ruuxii rumayn Eebbe iyo Maalintii dambeysay (Qiyaamaha).

Ruuxii Eebbe ka dhawrsadana wuxuu u furi faraj.

3. Wuxuuna ka irsaaqi meel aanu ka fileyniyn. Ruuxii Eebbe talo saartana waa ku filan yahay. Eebbana amarkiisu waa fuli, (waxna kama fakado = baxsado/badbaado). Wax walbana Eebbe wuxuu u yeelay waqti sugan (oo go'an).

Is-furiddu waa xaal diinta Islaamku aanay jeclayn, maxaayeelay waxaa ku dumi guri iyo qoys. Hase yeeshee, markay lagama maarmaan noqoto waa bannaan tahay. Waase in aan lagu xad gudbin haweeyneyda la furi. Waqti fiicanna la furaa, gurigana aan laga saarin intay ciddada ku jirto; waxaaba laga yaabaa inay isku noqdaane.

Waana in wanaag lagu wada noolaado, ama wanaag loo kala tago. Eebbana ha laga yaabo, taladana ha loo dhiibto illeyn wax walba Isagaa awoodee si uu faraj innoogu furo.

Rasuulkuna (naxariis iyo nabadgelyo Eebbe korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: "Ruuxii badiya dembi-dhaaf warsi wuxuu uga yeelaa Eebbe murugo walba faraj, cidhiidhi walbana ka bixid. Wuxuuna ka arsaaqaa meel aanu ka fileyn". Waxaa wariyey Imaam Axmed.

Adh-Dhalaq (1-3).

4. Haweenkiinna caadada ka quustay (caado-goys) haddaad shakidaan ciddadoodu waa saddex (3) bilood. Kuwa aan caado lahayna waa sidaas oo kale (saddex bilood). Haweenka uurka leh ciddadoodu waa inay umulaan (dhalaan). Ruuxii Eebbe ka dhawrsadana wuxuu u fududeyn amarkiisa.

5. Kaasi waa amarkii Eebbe uu idiin soo dejiyey. Ruuxii Eebbe ka dhawrsadana xumaantiisa ayuu asturaa, ajirkiiisana wuu weyneeyaa.

6. Dejiya haweenkaas (ciddada ku jira) meelaha aad deggan tihiin ee aad heli kartaan. Hana dhibina si aad u cidhiidhidaan. Hadday uur leeyihiinna nafaqeeya (masruufa) intay ka umulaan (ka dhalaan). Hadday ilmaha nuujiyaanna siiya ujuuro (masruuf iwm). Wanaagna is fara. Haddii la isku qabto nuujintana mid kale (hooyo kale) ayaa nuujin.

7. Ha ka nafaqeeyo (masruufo) midka awood xoolo leh awooddiisa. Kan wax yarna (xoolo yar) ha ka nafaqeeyo waxa Eebbe siiyey (ee uu karo). Eebbana kuma mashaqeeyo naf wax aanu siinin. Eebbana wuxuu yeeli cidhiidhi dabadiis fudeyd (faraj).

Diintu waxay u timid inay dadka u caddayso arrimahooda.

Sidaas daraadeed, aayadahani waxay ka warrami ciddada haweenka la furo. Taas oo ah in haweeyneyda aan caado lahayn ay saddax (3) bilood tirsan. Tan uurka lehina markay umusho.

Xaalkaasna waa arrin Eebbe soo dejiyey.

Tan kale, waa in hooyo loo yeelaa intay ciddada ku jirto, lana masruufo. Ruux walibana awooddiisa uu ka masruufo, illeyn Eebbe dadka kuma kallifo (mashaqeeyo) wax aanay awoodin e.

Ciddii Ilaahay ka yaabta, kuna xidhnaanta, Eebbe faraj ayuu u furi, xaalkiiisana wuu fududeyn.

Waxaanna soo sheegnay in 'cidhiidhi kasta Eebbe ka yeelo faraj' sida Imaam Axmed wariyey.

Adh-Dhalaq (4-7).

8. Maxay badan tahay magaalo caasiday amarka Eebbe iyo rusushiisa (rasuulladiisa).

Markaas Eebbe xisaabay, xisaab daran, caddibaad adagna caddibay.

9. Oo dhadhamisay cidhibtii xaalka xumaantiisa. Cidhibteediina ku dambeysey khasaare.

10. Eebbe wuxuu u darbay kuwaas caddibaad daran, ee Eebbe ka dhawrsada kuwa caqliga lehoow, rumeeyeyowna. Ilaahay wuxuu idiin soo dejiyey Quraane.

11. Rasuulna wuu idiin soo diray, kaas oo idiin akhriya Aayaadka Eebbe ee cad cad. Si uu kuwa Muu'iniinta ah, camal wanaagsanna falay, uga bixiyo mugdiga, nuurkana ugu bixiyo. Ruuxii Eebbe rumeeya, camal wanaagsanna fala wuxuu (Eebbe) gelin jannooyin ay dureerayso (qulqulayaan) dhexdeeda webiyaal. Wayna ku waari weligood. Eebbe waa wanaajiyey kuwaas risqigooda (arsaaqaddooda).

12. Eebbe waa Kan abuuray toddobo (7) samo, dhulkana kala mid dhigay. Amarka Eebbana wuxuu ku soo degaa dhexdooda, si aad u ogaataan in Eebbe wax walba karo, wax walbana koobay.

Kibir iyo isla weynaan, madax adayg iyo xaqa oo laga soo horjeesto waxay cidhibtiisu noqotaa halaag iyo caddibaad daran, sida ay la kulmeen gaaladii sidaas falay ee horreeyey. Hase yeeshee, dadka xaqa rumeeyey ee caqliga lehi waa inay aad ugu waano qaataan kuwaas. Eebbana ka dhawrsadaan, illeyn

waa Ka Quraanka u soo dejiyey, Rasuulna u soo direy, mugdigana ka saaray, nuurna u bixiyee. Si markaas wanaag iyo janno loogu abaal mariyo. Maxaa yeelay Eebbe waa Kan awoodda leh, wax walbana abuuray, wax walbana cilmigiisu koobay.

"Ruuxii dulmiya taako dhul ah, waxaa madaxa loo geliyaa toddobada (7) dhul". Waa Saxiix. *Adh-Dhalaq (8-12)*.

064: **Suurat At-Taghaabun**

Magaca Eebbe yaan ku bilaabaynaa ee Naxariis guud iyo Naxariis gaar ahba naxariista.

1. Waxaa Eebbe nasaha (weyneeya) waxa samaawaatka (cirka) iyo dhulka ku sugan. Awood iyo mahadbana Eebbaa iska leh, wax walbana Isagaa kara.

2. Eebbe waa Kan idin abuuray; qaarkiinna gaalo ayuu noqday, qaarkiinna Muu'miniin. Eebbana waxaad camal falaysan waa arkaa.

3. Samaawaatka (cirka) iyo dhulkaba wuxuu Eebbe u abuuray si xaq ah. Wuuna idin sawiray Eebbe, dadoow, suuraddiinana wuu wanaajiyey. Isagaana loo noqon (Aakhiro).

4. Wuxuu og yahay waxa samaawaatka (cirka) iyo dhulka ku sugan. Wuxuuna og yahay waxaad qarinqaysaan iyo waxaad muujinqaysaan. Eebbana waa og yahay waxa laabta (qalbiga) ku jira.

Eebbe waxaa u khushuuca una hogaansama awooddiisa waxa ku sugan cirka iyo dhulka sida Aayado badani sheegeen. Isagaana mahad iyo qudradba (awood iyo tamar) iska leh. Bani Adamkana Isagaa abuuray, jidkana tusay; samaan iyo xumaanba.

Abuurka Eebbana ciyaar ma aha ee waa xigmad (murti) iyo imtixaan. Waxa dadku camal falana (Eebbe) waa og yahay dhamaantiis.

Sidaas daraadeed, waa in niyadda iyo qalbigaba la daahiriyo, Eebbana la weyneeyo illeyn Isagaa awood leh, loona noqone.

At-Taghaabun (1-4).

5. Mivuuna idin soo gaadhin warkii kuwii gaalobay ee horreeyey. Waxay dhadhamiyeen xumaantii camalkoodii. Waxaana u sugnaaday caddibaad daran.

6. Arrintaas waxaa ugu wacan in rasuullo u la yimaaddeen xujooyin. Balse ay yidhaahdeen (gaaladii): "Ma dad baa na hanuunin?" Kaddiban ay gaalobeen oo jeedsadeen, iskana deeqtooneysiyeen (weynaysiyeen) Eebbe. Eebbana waa Midka hodanka ah, lana mahadiyo.

7. Waxay sheegeen kuwii gaalobay 'inaan la soo bixineynin' (la soo nooleyn doonin si loo xisaabiyo Aakhiro). Waxaad tidhaahdaa: "Sidaas ma aha. Eebbe wuxuu ku dhaartay in la idin soo bixin, la idiinkana warrami waxaad camal fasheen. Taasina waa u fududdahay Eebbe".

8. Ee rumeeya Eebbe iyo Rasuulkiisa iyo nuurka Eebbe soo dejiyey (Quraanka). Eebbana waxaad camal falaysaan waa og yahay.

9. Maalinta Qiyaamaha ee Ilaahay idin soo kulmin, waa maalin kado (kadeed, dhibaato iyo jirrab badan). Ruuxiise Ilaah rumeeya, camal wanaagsanna fala, Eebbe xumaantiisa (dembigiisa) wuu asturi. Wuxuuna gelin jannooyin ay dhex dureeraan (qulqulayaan) webiyaal, way kuna waaraan weligood. Taasina waa liibaan weyn.

10. Kuwa gaalobayse, beeniyeyna Aayaadka Eebbe waa kuwo ahlu naar ah. Waxayna ku waari (naar) dhexdeeda; meel loo ahaadana iyadaa u xun.

Warkii Ummaddii hore waxaa looga dan leeyahay in lagu waano qaato, lagana leexo jidkoodii xumaa ee xaq-diidka iyo madax adaygga ahaa. Lana rumeeyo Quraanka nuurka Eebbe ah iyo xaqo oo dhan, si Eebbe maalinta Qiyaame ee kulminta naxariis iyo jannooyin inoo siiyo. Loona gaadho liibaan Eebbe, lagana nabad galo naar daran oo loo darbay xaq-diideyaasha.

Muqaatilha wuxuu yidhi: "Ma jiro khasaare ka weyn in kuwaasina Jannada galaan, kuwaasna lala aado Naarta".

At-Taghaabun (5-10).

11. Wixii musiibo ah (dhib ah) oo dhaca waa idanka (amarka iyo awoodda) Eebbe. Ruuxiise Eebbe rumeeya waxaa hanuuni (oo xasili) qalbigiisa. Eebbana wax walba waa og yahay.
12. Eebbe addeeca (ka amar qaata), Rasuulkiisana addeeca. Haddaadse jeedsataan (xaqa diiddaan), waxaa Rasuulka saaran uun inuu si cad wax u gaadhsiiyo.
13. Eebbe mooyee Ilaah kale ma jiro. Isaga uun ha talo saarteen Muu'iniintu.
14. Kuwa xaqa rumeeyoow, haweenkiinna iyo carruurtiinna waxaa ka mid ah kuwo col idiin ah, ee ka digtoonaada. Haddaadse iska cafidaan, saamaxdaanna, Eebbe waa Dembi-dhaafe, Naxariiste ah.
15. Xoolihiinnu iyo carruurtiinnu waa uun fidno (ibtilo). Eebbe agtiisa ayaase ajar weyn (ku sugan yahay).

Wax waliba idanka Ilaah ayuu ku dhacaa. Ruuxiise Eebbe rumeeya waxaa hanuuni oo toosi xasilina qalbigiisa.

Sidaas daraadeed, waa in Eebbe iyo Rasuulkiisa Muxamad ah (naxariis iyo nabadgelyo Eebbe korkiisa ha yeelee) la addeeco. Waana in Eebbe lagu xidhnaado, lana talo saarto. Wax kasta oo xaqa kaa leexin ama kaa shuqlinna (mashquulin) laga digtoonaado, maxaayeelay Eebbaa wax loo dhowaado ah.

Rasuulkuna (naxariis iyo nabadgelyo Eebbe korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: "Ilmuhu waa midhaha qalbiga. Wayna ku fulayeyaan, kuna bakhayliyaan, kuna walbahaariyaan".

At-Taghaabun (11-15).

16. Eebbe ka dhawrsada intaad kartaan. Maqla oo addeecana (weyneeya). Waxna baxsada. Ruuxii laga dhawro bakhaylnimada naftiisa waa liibaanay.
17. Haddaad Eebbe amaah fiican amaahsataan (wax sadaqeysataan), Eebbe waa idiin laban-laabi, dembigiinana wuu dhaafi. Eebbana waa kan la Mahadiyo ee Dusha san.
18. Waxa maqan iyo waxa joogaba Eebbe waa og yahay, waana Adkaade, Fal-San.

Diinta Islaamku ma aha wax lagu dhaqmi waayi oo adag, ee waa fududdahay. Eebbana dadka wuxuu ka rabaa intay karaan uun inay ka yaabaan.

Waana in xaqa la isku maqlaa, layskuna addeecaa. Waxna la baxsadaa, bakhaylnimada iyo xoolo jaceylka daranna laga fogaadaa; si Eebbaha wax walba ogi innoogu abaal mariyo wanaag iyo khayr. Waxaa sugnaaday: "Haddaan wax idin faro la yimaadda waxaad kartaan. Haddaan (wax) idinka reebana ka reebtoonaada". Waa Saxiix.

At-Taghaabun (16-18).

063: **Suurat Al-Munaafiqun**

Magaca Eebbe yaan ku bilaabaynaa ee Naxariis guud iyo Naxariis gaar ahba naxariista.

1. Markay kuu yimaaddaan (Nebiyow) munaafiqiintu waxay odhan, "Waxaan marag ka nahay in aad tahay Rasuul Eebbe". Ilaahayna waa og yahay in aad tahay rasuulkiisii. Eebbana wuxuu marag ka yahay inay munaafiqiintu beenaaleyaal yihiin (xagga niyadda).
2. Dhaartooda (beenta ah) ayey ka dhigteen gaashaan. Dadkana waxay ka iileen jidkii Eebbe. Waxay samaynaa aad buu u xun yahay.
3. Sidaas waxaa ugu wacan inay (xagga muuqa) rumeeyeen, haddana (hoosta) ka gaaloobeen. Quluubtoodana waa la daabacay (la daboolay), wax xaq ahna ma kasayaan (ma garanayaan).
4. Haddaad aragto munaafiqiinta waad la yaabi jidhkooda iyo muuqooda. Hadday hadlaanna waad dhegeysan hadalkooda, waxaadse mooddaa dogobyoy la tiirtiiriyey. Qayladii yeedhabana way ka cabsadaan. Waa col kuwaasi. Eebbana ha lacnado (nacdalo) ee xaggee loo duufsan.

Suuraddani waxay ka sheekayn munaafiqiinta iyo xumaantooda. Maxaa yeelay xagga muuqaalka waxay sheegan inay xaqa rumeeyeen, xagga hoosna waxay Islaamka u la joogaan colnimo iyo xumaan.

Kuwaasi waa ahlu naar ee yaanay kugu khaldin bidhaanta iyo afka macaan ee suntu ka hoosayso.
Al-Munaafiquun (1-4).

5. Marka lagu yidhaahdo munaafiqiinta, 'Kaalaya Rasuulku ha idiin dembi-dhaaf weydiye Eebbe e' waxay ruxaan madaxa (diidmo darteed). Waxaad aragtaa iyagoo jeedsan oo is kibrin (kibraaya).
6. Waa isku mid haddaad u dembi-dhaaf weydiisid (Nebiyow) iyo haddii kale. Marnaba Eebbe u dembi-dhaafi maayo, maxaa yeelay Eebbe ma hanuuniyo dad faasiqiin ah (falal xun sameeyeyaal).
7. Waa kuwa odhan (munaafiqiintu), "Ha quudinnina kuwa Rasuulka la jooga intay ka kala tagaan". Eebbaa iska leh khasnadaha samaawaatka (samooyinka) iyo dhulka. Hase yeeshee, munaafiqiintu ma fahansana.
8. Munaafiqiintu waa kuwa odhan, "Haddaan Madiina u noqonno, waa in kuwa tabarta (tamarta) lihi ka bixiyaan magaalada kuwa dullaysan". Tabar iyo sharaf Eebbaa iska leh iyo Rasuulkiisa iyo Muu'iniinta. Hase yeeshee, munaafiqiintu ma oga.
9. Kuwa xaqa rumeeyow, yaanay idinka shuqlinin (mashquulin) xoolihiinnu iyo carruurtiinnu xuska Eebbe (daacaddiisa). Ciddii sidaas fashaana waa mid khasaartay.
10. Bixiyana wax ka mid ah waxa Eebbe idinku arsuqay geerida horteeda (inta aad nooshihiin). Oo markaas uu yidhaahdo (ruuxii aan wax baxsan), "Eebboow maad muddo dhow dib ii dhigtid oo aan (wax) sadaqaysto. Kuwa suubanna aan ka mid noqdee".
11. Naf malaggeedii galayna Eebbe dib uma dhigo. Ilaahayna waa og yahay waxaad camal falaysaan.

Isla weynidu waa xun tahay. Mana aha in ruux caqli (garaad) lihi diido in wanaagga loogu yeedho. Hase yeeshee, arrinta Ilaahay baa maamula, risqigana isagaa bixiya, ee ma aha sida ay munaafiqiintu moodeen.

Tan kale, waa in aan xoolaha iyo carruurtu sabab u noqonnin Eebbe ka fogaansho, illeyn waa khasaare sidaasiye.

Waana in wax la baxsadaa geeri ka hor si dadka suubban (wanaagsan) looga mid noqdo. Oo aan hadhowna loo calaacalin, illeyn naf malaggeedii (wedkeedii) galay Eebbe ma sugo e (uma kaadiyo). Ibnu Cabbaas wuxuu yidhi: "Ruuxii leh xoola gaadhsiiya Xajka Beydka Eebbe ama seko ku waajibto ee aan falin, wuxuu warsan (ka codsan) Eebbe markuu dhiman in loo celiyo Adduunkii".

Al-Munaafiquun (5-11).

062: **Suurat Al-Jumucah**

Magaca Eebbe yaan ku bilaabaynaa ee Naxariis guud iyo Naxariis gaar ahba naxariista.

1. Waxaa Eebbe nasihi (weyneyn) waxa samooyinka iyo dhulka ku sugan. Ilaahay waa Xaakin, Xumaan-ka-daahirane ah, Adkaade, Falsame ah.
2. Eebbe waa Kan u soo bixiyey kuwa aan wax aqoon Rasuul ka mid ah oo ku akhriya korkooda Aayaadkiisa, (Quraankana) bara iyo Sunnada (Nebiga). Waxayna horey u ahaayeen kuwo baadi cad ku sugan.
3. (Waxaa kale oo Eebbe Nebiga u diray) kuwo kale oo aan weli la kulmin kuwaas. Eebbena waa Adkaade, Falsame ah.
4. Arrintaasina (Islaamka iyo Nebiga la soo diray) waa deeq Ilaah, wuxuuna siin ruuxuu doono. Eebbana waa Deeq iyo Fadli weyne.

Waxaa Ilaahay u khushuuca waxa uu ku abuuray cirka iyo dhulka, illeyn Isagaa awood lehe. Waana Kan addoomadiisa wanaagga u falay ee u soo diray Rasuul bani Aadan ah, si uu u hanuuniyo waxna u baro; kuwa jooga iyo kuwa iman doonaba.

Xaalkaasina waa xaal weyn oo kheyr ah cidduu (Ilaahay) doono ayuuna siiyaa, illeyn waa Deeq badane e.

Al-Jumucah (1-4).

5. Kuwii la faray inay Kitaabka Tawreed (ilaaliyaan) kuna camal falaan (waa Yuhuudda), haddana aan ku camal falin, waxay la mid yihiin dameer xambaarsan kutub badan. Waxaana xun masalka (tusaalaha) kuwaas beeniyey Aayadaha Eebbe. Ilaahayna ma hanuuniyo kuwo daallimiin ah.

6. Waxaad tidhaahdaa (Nebiyooow): "Kuwa Yuhuudda ahoow, haddaad sheegateen inaad tihiiin awliyo Eebbe dadka kale ka sokow, geeri jeclaada. Haddaad run sheegaysaan".

7. Geerina ma jeclaanayaan weligood. Waxay hor marsadeen (oo gef ah) dartiis. Eebbana waa og yahay kuwa daallimiinta ah.

8. Waxaad ku tidhaahdaa: "Geerida aad ka cararaysaan way idin la kulmi. Markaasaa la idiin celin Ilaah og waxa maqan iyo wax joogaba. Markaasuu idinka warrami (idinka jaasin/abaal marin) waxaad camal falayseen.

Waa in Quraanka lagu camal falaa, lana raacaa si aan loola mid noqonin Yuhuuddii dayacday Kitaabkii Tawreed, markaas Eebbe ku maslay (tusaaleeyey) dameer kutub lagu raray. Jeclaanshaha Ilaahayna wuxuu ku xidhan yahay sida loo caabbudo iyo sida loo falo wuxuu ku faray, ee ma aha sheegasho inuu ku jecel yahay sida Yuhuuddu fasho.

Sidaas daraadeed, waa in Eebbe si dhab ah loo caabbudaa, illeyn Isagaa loo noqon e.

Al-Jumucah (5-8).

9. Kuwa xaqa rumeeyoow, marka laysugu yeedho salaadda maalinta Jimcaha ah, aada xusidda Eebbe. Wax gadashadana (ganacsi) ka taga. Sidaas ayaa idiin kheyrron, haddaad tihiiin kuwo wax og.

10. Markase salaadda la dhammeeyo, dhulka ku kala faafa, dalbana (doona) kheyrrka Eebbe. Ilaahayna xusa in badan waxaad u dhow dihiin inaad liibaantaan e.

11. Markay arkaan tijaaro (ganacsi) ama ciyaar (wax lagu shuqloomo) way aadaan. Waxayna kaa tagaan nebiyow adigoo taagan (khudbad akhriyi). Waxaad tidhaahdaa: "Waxa Eebbe agtiisa ah ayaa ka kheyrr badan ciyaar iyo ganacsiba." Ilaahay waa kan ugu kheyrr badan inta (cid) wax arsaaqda.

Salaaddu waa tiirka labaad ee diinta Islaamka. Dadaalkeeduna waa waajib culus; ama tan Jumcada ha ahaato ruux ay ku waajibtay ama tan kale ee caadiga ah ha noqotee. Waana in aan laga shuqloomin mar hadduu waqtigeedu (soo) galo, iyadoo ay waajib tahay in shaqada iyo kasabka xalaasha ah lagu dadaalo.

Aayadda kow iyo tobnaadna waxay ku soo degtay mar nebigu (naxariis iyo nabadgelyo korkiisa Eebbe ha yeelee) uu khudbad Jimce akhriyaayey oo safar badeeco wadaa soo galay (magaalada) Madiina. Markaas dad Asxaabtii ka mid ahi aadeen.

Sida Eebbe sheegay kheyrrka agtiisa ah ayaa ka wanaagsan ciyaar iyo ganacsiba.

Rasuulkuna (naxariis iyo nabadgelyo Eebbe korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: "Ruuxii hadla maalinta Jimcaha isagoo iimaamku khudbadda akhriyi, wuxuu la mid yahay dameer kutub xambaarsan. Ruuxii ku yidhaahda aamusna (salaadda) Jimce uma jirto". Waxaa weriyey Imaam Axmad.

Al-Jumucah (9-11).

061: **Suurat As-Saff**

Magaca Eebbe yaan ku bilaabaynaa ee Naxariis guud iyo Naxariis gaar ahba naxariista.

1. Waxaa Ilaahay nasaha (weyneeya) waxa cirka iyo dhulka ku sugan. Eebbana waa Adkaade, Fal-San.

2. Dadka xaqa rumeeyayoow, maxaad u sheegaysaan wax aydaan falaynin?

3. Waxaa cadho weyn Eebbe agtiisa ku ah inaad sheegtaan wax aydaan falaynin.

4. Eebbe wuxuu jecel yahay kuwa ku dagaallama jidkiisa (jihaadka), iyagoo saf ah oo aad mooddo dhisimo la isku dhejiyey (midnimadooda).

Samaawaatka (samooyinka) iyo dhulkaba waxa ku sugan Ilaaheen baa abuuray. Isagayna ka amar qaataan, wayna u khushuucan, maxaa yeelay Isagaa awood leh.

Kuwa Muu'miniinta ahina waa inay wax dhab ah qabtaan oo kheyr ah, ee aanay sheeganin wax aanay falin, maxaa yeelay taas Eebbe ma jecla.

Waana in jidka xaqa ah lagu jihaado si isku duubni ah, si gargaarka Eebbe iyo nasrigiisa (guul) loo helo.

Rasuulkuna (naxariis iyo nabadgelyo Eebbe korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: "Calaamadda munaafiq u waa Saddex: Hadduu ballamo (ballan-qaado) wuu baajiyaa. Hadduu sheekeeyana wuu been sheegaa. Haddii la aamminana wuu khiyaameeyaa". Waa saxiix.

As-Saff (1-4).

5. Xusuusta markii (nebi) Muuse ku yidhi dadkiisii: "Maxaad ii dhibaysaan idinka oo og inaan rasuul Eebbe idiin ahay?" Markay xaqii ka iisheen (leexdeen) ayaa Eebbana sii ilay qalbigooda. Ilaahayna ma hanuuniyo kuwa faasiqiinta ah.

6. Xusuusta markii (nebi) Ciise Ibnu Maryama ku yidhi (reer) Bani Israa'iil: "Waxaan ahay rasuul Eebbe idiin soo diray oo rumayn Kitaabkii Tawraad ee horreeyey. Kuna bishaareyn rasuul gadaashayda iman oo magaciisuna yahay Axmed". Markuu xujo cad ula yimidna waxay yidhaahdeen, "Kani waa sixir cad".

Muslimiintu waxay rumeyn nebiyadii iyo rusushii Eebbe khalqiga u soo diray oo dhan, iyaga oo aan kala qaadaynin siday u rumeeyeen Kutubta Eebbe ee saxa ah.

Waxayna aayadahani ina tusayaan in xaqu mid keliya yahay. Hase yeeshee, gaaladu ay kala qaybiyaan si ay qaar u beeniyaan.

Waxaa kale oo ku cad aayadahan in nebi Ciise ku bishaareeyey soo bixitaanka nebi Maxamed (naxariis iyo nabadgelyo korkiisa Eebbe ha yeelee). Taasina waxay xujo ku tahay gaalada Nebiga beenin.

As-Saff (5-6).

7. Yaa ka dulmi badan ruux ku been abuurta Ilaahay isagoo loogu yeedhi Islaamka? Eebbe ma hanuuniyo dadka daallimiinta ah.

8. Waxay doonayaan (gaaladu) inay nuurka (xaqa) Eebbe ku bakhtiiyaan afkooda. Eebbena wuu taam yeeli (dhammeystiri) nuurkiisa, haba naceen gaaladuye.

9. Eebbe waa Kan diray rasuulkiisa isagoo hanuun wada iyo diin xaq ah si uu (Eebbe) diimaha oo dhan uga sare mariyo, haba naceen mushrikiintuye (gaaladu).

Xaqa oo la diidaa waa dulmi iyo gardarro. Mana aha in ruuxii xaqa loogu yeedhaa uu ka abaal daro oo diiddo oo beenin kala soo horjeesto.

Hase ahaatee, wuxuu Eebbe ballan qaaday in xaqu sare maro, gaar ahaan, hanuunkii uu dunida u soo saaray Isagoo u soo dhiibay rasuulkiisii Maxamed ahaa (naxariis iyo nabadgelyo Eebbe korkiisa ha yeelee).

Ruuxa caqliga lehna waxaa ku waajib ah in marka xaqa iyo wanaag loogu yeedho uu raaco oo aqbal. *As-Saff (7-9).*

10. Kuwa xaqa rumeeyoow ma idin tusaa ganacsi idinka koriya cadaab daran?

11. Waxaad rumaynaysaan Ilaahay iyo Rasuulkiisa. Waxaadna ku dagaalamaysaan jidkiisa xaqa ah, idinkoo xoolihiinna iyo naftiinna u huri. Sidaas ayaana idiin kheyr roon, haddaad tihin kuwo wax og.

12. Markaas Eebbe dembigiinna ayuu dhaafi. Wuxuuna idin gelin jannooyin ay dhex socdaan webiyaal iyo guryo wanaagsan oo ku dhexyaalla jannada Cadnin (negaanshaha). Taasina waa liibaan weyn.

13. Arrin kale oo aad jeceshihiinna (wuu idiin siin) waa gargaarka Eebbe iyo fatxi (guul) dhow. Kuwa xaqa rumeeyeyna u bishaaree.

14. Dadka xaqa rumeeyoow, noqda gargaareyaasha Eebbe sidii kuwii nebi Ciise Ibnu Maryama saaxiibbadiis ahaa (Xawaariyintii) ee uu ku yidhi: "Yaa Eebbe iila gargaara?" Markaas ay yidhaahdeen, "Annagaa ah gargaareyaashii Eebbe". Kaddib ay xaqa rumaysay koox (reer) Banii Israa'iil ka mid ah, kooxina ay ka gaaloowday. Eebbena ayiday (xoojiyey) kuwii xaqa rumeeyey (kana adkaadeen cadawgoodii), oo iyagu ka muuqdeen (ka taliyeen) dhulkii.

Aayadahani waxay caddeyn in ganacsiga ugu kheyr badan ee dembiga lagu dhaaf, jannana lagu galaa uu yahay Eebbe iyo Rasuulkiisa oo la rumeeyo. Iyo jidkiisa oo lagu dagaallamo, xoolo iyo nafba, si loo daafaco xaqa. Loona helo nasri iyo guul, lana noqdo sidii Xawaariyintii (saaxiibbadii) nebi Ciise. Dhulkana loo hadho, isaga oo kheyr lagu maamuli.
As-Saff (10-14).

060: **Suurat Al-Mumtaxinah**

Magaca Eebbe yaan ku bilaabaynaa ee Naxariis guud iyo Naxariis gaar ahba naxariista.

1. Kuwa xaqa rumeeyoow, ha ka dhigannina colka Eebbe iyo colkiinna (gaalada) sokeeye aad jacayl u gudbinaysaan, iyagoo ka gaaloobay xaqa idiin yimid. Oo haddana bixiya (qaxiya) Rasuulka iyo Muuminiinta inaad Eebbe rumeeyseen darteed, jidka Ilaahayna aad ku dagaallanteen raalli ahaanshaha Eebbe idinka oo raba. Kuwaas oo aad u qarisaan jacayl. Ilaahayna waa og yahay waxaad qarinsaysaan iyo waxaad muujinaysaanba. Ruuxii sidaas yeelaana jidka xaqa ah wuu ka dhumay (gaaloobay).
2. Hadday idin helaan (gaaladu) waxay idiin noqon col gacmaha iyo carrabkana xumaan bay idiinku taagi. Waxayna jecel yihiin in aad gaaloowdaan.
3. Qaraabada iyo carruurta waxba idiin ma taraan Maalinta Qiyaame. Waana la idin kala kaxayn. Ilaahayna waa arkaa waxaad camal falaysaan.

Colka Eebbe iyo colkaaga inaad saaxiib ka dhigataa ma habboona. Gaaladuna waxay Muslimiinta kula colloobeen waa diinta Islaamka ah keliya. Ruuxii Muslim sheegan oo gaalo cadow ah jacayl u qariyaana waa ruux dhumay (lumay) oo leexday. Gaaladuna sokeeyennimo ma leh ee waa in sidaas lala socdaa.

Aayaduhuna waxay soo degeen mar nebigu (naxariis iyo nabadgelyo Eebbe korkiisa ha yeelee) uu u darbaday in Maka la soo furo, markaas nin gaadhsiiyey reer Makaad arrintaas.

Al-Mumtaxinah (1-3).

4. Kuwa xaqa rumeeyey waa inay ku daydaan nebi Ibraahim (nabadgelyo korkiisa ha ahaato e) iyo kuwii la jiray. Waa kuwii iska beri yeelay gaaladii qoomkoodii ahayd (ay isla noolaayeen) iyo waxay caabbudayeen ee Eebbe ka soo hadhay. Oo ay colnimo u muujiyeen ilaa ay Eebbe keliya ka rumeeyaan. Laakiin nebi Ibraahim wuxuu u dembi dhaaf weydiyey aabbihis, isagoon waxba u hanan karin (intaan laga reebin arrintaas). Eebbe ayeynu talo saaran. Isagaan u toobbad keeneynaa, Isagaana loo noqon (Aakhiro).
5. Eebow ha nagu fidneynin kuwa gaaloobay, noona dembi dhaaf illeyn waxaad tahay Adkaade (Casiis), Fal-San.
6. Ha ku daydo dadkaas, dayasho wanaagsan ruuxii dooni Ilaahay Maalinta Aakhiro. Ciddiise ka jeesata xaqa, Eebbe waa ka kaaftoon yahay, waana ammaan yahay.

Ruuxa fiican ee sharafta leh ee Eebbe ka yaaba, wax wanaagsanna sameeya, xumaantana ka fogaada waa in lagu daydo sida kan xunba looga fogaado. Eebbana waa in lagu xidhnaado, loona toobbad keeno, Isagaa loo noqone. Gaaladana waa in aan la jeclaanin, lagana digtoonaadaa.

Al-Mumtaximah (4-6).

7. Wuxuu Eebbe u dhow yahay inuu yeelo jacayl Muu'iniinta iyo kuwa ay la colloobeen ee gaalada Qureysheed ah dhexdooda, maxaa yeelay Eebbe wax walba waa karaa, waana Dembi-dhaaf badane, Naxariis badane ah.
8. Eebbe kama reebayo kuwa xaqa rumeeyey inay u samo iyo caddaalad falaan kuwa aan diinta kula dagaallamin, guryahoodana ka bixinnin (qaxinnin), maxaa yeelay Eebbe waa jecel yahay kuwa caaddiliinta ah (garsoor).
9. Eebbe wuxuu ka reebi kuwa xaqa rumeeyey inay ka sokeeye yeeshaan oo xidhiidhiyaan kuwa diinta kula dagaallamay ee (Muslimiinta) guryahoodii ka bixiyey (qaxiyey), gacanna ku siiyey in guryaha laga bixiyo. Dadkii kuwaas sokeeye ka dhigtaa waa kuwo daallimiin ah.

Eebbeheen Isagaa awood leh, cidduu doonana wuu hanuuniyaa.

Waxaana dhacday in dad gaaladii Qureysheed ka mid ahi islaameen, wanaag iyo walaalnimana dhex martay Muslimiintii kale.

Waase in aan gaal kula dagaallamay wanaag loo sameymin.

Kuwase aan col Muslimiinta la noqonin, gaaladana aan gacan ku siinnin dhibka Muslimiinta, ma reebbana in wanaag loo falo.

Taasina waxay ina tuseysaa in aan kala garanno colkeenna iyo saaxiibkeenna.

Xigmad waxaa ku sugnaaday: "Ka aad jeclaan tartiib u jeclow, in aad nacdaa laga yaabaa e. Ka aad necbaanna tartiib u nac, inaad jeclaataa laga yaabaa maalin e".

Al-Mumtaxinah (7-9).

10. Kuwa xaqa rumeeyoow hadday idiin yimaaddaan haween Muu'iniin ah oo gaalada ka soo hijrooday (ka soo tegey) imtixaana (inay ka dhab tahay iyo in kale). Eebbaa og iimaankooda. Haddaad ogaataan inay xaqa (dhabnimo) u rumeeyeen, waa in aydaan gaalada u celinin, maxaa yeelay xalaal isuma aha. Meherkiina ha u celiyeen gaalada. In aad isguursataanna waxba kuma jiro, haddaad meher siinaysaan. Haweenka gaalooba nikaax (guur xalaal ah) isuguma kiin xidhna ee ha haysanina. Weydiista waxaad meher u bixiseen. Gaaladuna ha weydiisato waxay meher u bixiyeen. Xaaladdaasina waa xukunka Eebbe uu dhexdiinna xukumay. Ilaahayna waa og yahay (waxa la camal falo), waana Falsame.
11. Hadday u tagaan kuwa haweenkiinna ka mid ahi gaalada (gaaloobaan), markaas ka dib la qaniimaysto, hala siiyo kuwii haweenkoodu tageen waxay ku masruufeen oo kale. Ilaaha aad rumaysan tihinna ka dhawrsada.

Gaaladu waa in aanay Muslimiinta awood ku yeelanin. Sidaas daraadeed, hadday soo islaamto haweenay ninkeedu gaal yahay looma celiyo, maxaa yeelay xalaal isuma aha.

Waase in la imtixaamo si runta loo ogaado. Markaas ka dib hadday nin Muslim ah guursato dhibi kuma jirto, iyadoo la isu celin wixii kharash ahaa.

Taasina waxay ku tuseysaa inay waajib tahay dhawritaanka sharafta Islaamka iyo ruuxa Muslimka ah. Waxaa kale oo ay inna tuseysaa caddaaladda Islaamka xataa mucaamilada (la dhaqan) gaalada.

Al-Mumtaxinah (10-11).

12. Nebiyoow hadday kuu yimaaddaan haween xaqa rumeeyey si ay kuugula ballantamaan inay Eebbe keliya caabbudaan, waxna xadin, sinaysanna, carruurtoodana dilin, been abuurna aanay la imaan, wax wanaag ah oo la farayna aanay nebiga ku caasiyin; la ballantan una dembi dhaaf weydii, Eebbe waa Dembi-dhaafe, Naxariiste ahe.
13. Kuwa xaqa rumeeyoow, ha ka sokeeye dhiganina kuwa Eebbe u cadhooday oo Aakhirana ka quustay (waa gaalo oo dhan e) sida gaaladu uga quusatay kuwii dhintay.

Ruuxii xaqa rumeeyey oo la ballantama madaxda Muslimka ah, kuna ballan qaadi inuu xumaanta ka dheeraado, wanaagna la yimaaddo waa in la ballantamaa. Sida Eebbaba faray nebiga (naxariis iyo nabadgelyo Eebbe korkiisa ha yeelee) inuu haweenka Muslimka ah ka oggolaado ballan-qaadka.

Tan kale, waa in gaalo Eebbe u cadhooday oo Aakhiro iyo maalinta abaal marinta ka quustay aan laga

dhigannin sokeeye iyo qaraabo, illeyn waxaa lugu walaaloobaa caqiidada (mabda'a) Islaamka e. *Al-Mumtaxinah (12-13)*.

059: **Suurat Al-Xashr**

Magaca Eebbe yaan ku bilaabaynaa ee Naxariis guud iyo Naxariis gaar ahba naxariista.

1. Waxaa Eebbe nasaha (sharfa) waxa cirka iyo dhulka ku dhex nool. Waana Xoog badane, Fal-San.
2. Eebbe waa Kan ka bixiyey kuwii gaalobay ee ehlu Kitaabka ahaa (Yuhuud) guryahoodii kulmintii hore, idinkoon u malaynin inay bixi, iyana waxay u maleeyeen in guryahoodu wax ka celin. Markaasaa Eebbe uga yimid meel aanay fileyn. Qalbigoodana wuxuu ku tuuray cabsi. Guryahooda waxay ku kharribeen (ku halleeyeen) gacmahooda iyo gacmaha kuwa rumeeyey, ee dadka caqliga lehi ha (ku) waano qaato.
3. Haddii aan Eebbe xukumin inay baxaan waxaa lagu caddibi lahaa Adduunka. Aakhirona waxaa u sugnaaday cadaab naareed.
4. Maxaa yeelay Ilaahay iyo Rasuulkiisa ayey khilaafeen. Ruuxii Eebbe khilaafeen cigaabtiisu waa daran tahay.
5. Wixii aad goysaan oo geed ah (ee cadowga) ama aad daysaan iyadoo ku taagan salkeeda, waa idanka (awoodda iyo amarka) Eebbe iyo inuu dulleeyo faasiqiinta.

Yuhuuddii magaalada Madiina joogtay ayaa nebiga (naxariis iyo nabadge iyo korkiisa Eebbe ha yeelee) khiyaantay (khiyaameysay).

Hase ahaatee, waxaa u dambeeyey dulli iyo cigaab illeyn Ilaahay iyo Rasuulkiisa ayey la colloobeene, sida caadada Yuhuudduba tahay had iyo jeer.

Waana in lagu waano qaato xaalkaas. Jidka toosanna la qaadaa.

Al-Xashr (1-5).

6. Wixii xoolo ah ee Ilaahay nebiga (NINKHA) uga soo celiyo gaalada isagoon fardo iyo awr lagu dagaallamin, waxaa amarkiisa leh nebiga (NINKHA). Eebbana cidduu doono ayuu ku diraa Rasuulkiisa. Wax walbana waa karaa.
7. Wixii xoolo ah ee Ilaahay ku soo celiyo Rasuulkiisa ee uga yimaadda degmooyinka Yuhuudda; waxaa leh Ilaahay, Rasuulka, qaraabada, agoonta, masaakiinta iyo musaafiriinta (socdaalka) si aanay u noqon wax ku wareegeysta kuwa hodanka ah dhexdooda. Wuxuu Rasuulku dadka siiyo ama faro waa inay qaataan, wuxuu ka reebana waa inay ka reebmaan. Eebbana waa in laga dhawrsado, maxaa yeelay cigaabtiisu waa daran tahay.
8. Waxaa xoolahaas wax ku leh kuwa saboolka ah ee ka soo hijrooday guryahoodii iyo xoolahoodii dar Eebbe iyo gargaarka Ilaahay iyo Rasuulkiisa. Waana kuwa ku run sheegay iimaankooda.

Xoolaha gaalada si dagaal la'aan ah uga yimaadda waxaa loo yaqaan feey, waxaana lagu bixin jidadka kheyarka ah ee aayaddu tilmaantay.

Dadka xaqa rumeeyeyna waxaa ku waajib ah inay maqlaan hadalka Rasuulka (Muxamed) ah (naxariisiyo nabadge iyo Eebbe korkiisa ha yeelee). Waana in cigaabta Eebbe laga dhawrsadaa.

Al-Xashr (6-8).

9. Kuwii Madiina degganaa ee Xaqa rumeeyey waxay jecel yihiin dadka u soo hijroon (u soo qixi). Wax necbaansho ahna laabta uma geliyaan dadkaas waxay siin. Waxayna naftooda ka hor mariyaan (ay uga doori) dadkaas inkastaba iyagu gaajo ha haysee. Ruuxii laga dhawro bakhaylnimada naftiisa, waa mid liibaanay.
10. Kuwa iman asxaabta nebiga (NINKHA) ka dib waxay Eebbe weydiisan inuu u dembi dhafo iyaga iyo walaalahooda iimaanka uga hormaray, oo aanu qalbigoodana xiqdi (colaad/naceyb) yeelin kuwa rumeeyey. Eebbana waa Naxariis badane.

Ansaartii nebiga (naxariis iyo nabadgelyo korkiisa Eebbe ha yeelee) waxay ahaayeen duul la yaab leh. Siday u jeclaayeen una taakuleeyeen Muslimiintii soo hijrootay ee Maka ka soo qaxay Eebbe dartiis. Iyagana naftooda uga doori (door bidi) jireen (Eebbe ha ka raalli noqdee).

Kuwa xaqa rumeeyey ee dib ka iman waa inay jeclaadaan Muslimiinta ka horreysay, uguna duceeyaan dembi dhaaf iyo kheyir illeen dadaal badan bay Islaamka u sameeyeen.

Nebigu (naxariis iyo nabadgelyo Eebbe korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: "Dulmi iska jira, waa mugdiga Qiyaame. Bakhaynimana iska jira, iyadaa halaagtay kuwii idinka horeeyey e". Waxaa wariyey Muslim.

Al-Xashr (9-10).

11. Ma og tahay in kuwii munaafiqiinta ahaa ay ku odhan kuwii gaaloobay ee Yuhuudda ahaa, "Haddii la idin bixiyo (qaxiyo) waan idin la jiraynaa, cid aan idiin maqlaynaana ma jirto weligeed. Haddii la idinla dagaallamona waan idiin gargaareynaa. Ilaahayna waa og yahay inay beenaaleyaal yihiin.

12. Haddii la bixiyo Yuhuudda lama baxaayaan, haddii lala dagaallamona uma gargaarayaan. Hadday isku dayaan inay u gargaaraanna way carari, loomana gargaarayo.

13. Muu'iniinta ayey uga cabsi badan yihiin Yuhuuddu Ilaahay, maxaa yeelay waa dad aan wax-garad ahayn.

14. Kuwa xaqa rumeeyeyna lama dagaallami karaan (dhufaysyo iyo gidaarro dhexdood mooyee). Dhibka dhexdooda ahna waa daran yahay. Quluubtooduna waa kala tagaan tahay, maxaayeelay waa dad aan wax kasayn (garanayn).

Munaafiq had iyo jeer wuxuu la joogaa dhibka Muslimiinta. Munaafiqiintii Madiina joogayna waxay gacan siin jireen Yuhuudda oo ay ka dhigan jireen sokeeye. Labada qolobana (munaafiqiin iyo Yuhuud gaalo ah) waxay ahaayeen, yihiinna had iyo jeer colka diinta Islaamka. Waana laga adkaan haddii dad toosan oo xaqa rumeeyey la helo, maxaa yeelay waa wax-ma-garad.

Al-Xashr (11-14).

15. Waxay la mid yihiin gaaladii dhowaa ee ka horreeyey ee dhadhamiyey cidhibtii camalkooda, cadaab daranina u sugnaaday.

16. Waxay la mid yihiin shaydaan, waa ka dadka 'gaaloow' (gaal noqo) ku yidhaahda. Markay gaaloobaanna ku yidhaahda, 'Beri baan kaa ahay' (waxba isuguma keen jiraan) oo sheegta inuu Ilaahay ka yaabi!

17. Markaasay labadoodaba cidhibtoodu nogon naar ay ku waaraan. Daallimiintana sidaas ayaa lagu abaal mariyaa.

18. Kuwa xaqa rumeeyey waa inay Eebbe ka dhawrsadaan. Naf walibana waa inay eegtaa waxay u hor marsatay berri (Qiyaamaha). Eebbena ha laga yaabo, illeyn wax walba waa og yahaye.

Kibir iyo isla-weyni wax ma tarto. Meeye kuwii is kibriyey ee beeniyey nebiyadii ka horreysay nebi Muxamed (naxariis iyo nabadgelyo korkiisa Eebbe ha yeelee)? Gaaladuna wax bay dhumiyaan (habaabiyaan) sida shaydaanka. Cidii wax dhumisa (gaaleysa) iyo midda la dhumiya (gaaleeyey) waxay cidhibtoodu nogon khasaare iyo naar.

Al-Xashr (15-18).

19. Kuwa xaqa rumeeyey waa in aanay noqon sidii kuwii Eebbe hilmaamay, isna markaas uu hilmaansiyeey naftooda. Waana kuwo faasiqiin ah (xaqa ka leexday).

20. Ma eka (sinna) ehlu naarka iyo ehlu jannuhu. Ehlu jannuhu waa kuwa liibaanay.

21. Haddii Quraankan uu Eebbe buur ku dejiyo (kula hadlo), waxaad arki lahayd buurtii oo khushuucsan oo (dil)dillaaci cabsi Eebbe darteed. Sidaas ayaa Eebbe mataallo (tusaaleyaal) ugu sheegaa dadka, inay fikiraan darteed.

22. Eebbe mooyee Ilaah kale ma jiro. Waxa maqan iyo waxa joogaba waa og yahay. Waana Kan Naxariis guud iyo Naxariis gaar ahba naxariista.

23. Ilaahay isaga mooyee Eebbe kale ma jiro. Waa Xaakim Daahir ah, Nabadgeliye, Rumeeye, Wax walbana Ilaaliye. Xoog iyo weynaan Isagaa leh. Waana ka nasahan yahay waxay cibaadada la wadaajinayaan.

24. Eebbe waa Kan wax abuurta ee ahaysiiya, sawirana. Magacyo fiicanna wuu leeyahay. Waxaana Eebbe u tasbiixsada (weyneeya) waxa cirka iyo dhulka ku sugan. Waana Adkaade, Fal-Same ah.

Ruuxa xaqa rumeeyey waa inuu had iyo jeer Eebbe xusaa, kuna xidhnaadaa, si aan Eebbe naftiisa u hilmaansii. Jidka fiicanna waa inuu qaadaa illeyn janno iyo naari ma sinna e. Quraankan sharafta lehna waa inuu rumeeyaa, kuna dhaqmaa. Ilaaha awoodda leh, ee isaga mooyee Ilaah kale aanu jirinna, waa inuu caabbudaa oo rumeeyaa.

Al-Xashr (19-24).

058: **Suurat Al-Mujaadalah**

Magaca Eebbe yaan ku bilaabaynaa ee Naxariis guud iyo Naxariis gaar ahba naxariista.

1. Eebbe wuxuu maqlay haweeneydii hadalkeeda nebiga (NINKHA) kula doodayday xaalkii ninkeeda, oo Eebbe u sheeganaysay (dhibaatadeeda). Eebbana wuu maqlayey dooddooda, maxaayeelay Ilaahay waa Ka wax walba Maqla, ee Arka.

2. Kuwa haweenkooda kala mid dhiga hooyadood oo kale, haweenkoodu ma aha hooyadood. Hooyo waa midda wax dhashay. Kuwaasina waxay ku hadlayaan hadal xun iyo been. Ilaahayna waa Saamax badane, Dhaafid badane.

3. Kuwa haweenkooda kala mid dhigi hooyadood, haddana ku noqon (haweenkii), waxaa ku waajib ah qoor xoraynteed inta aanay istaaban. Arrintaasi waa waano, Ilaahayna waxa dadku camal fali waa og yahay.

4. Ruuxii aan helin qoor uu xoreeyo, wuxuu soomi laba (2) bilood oo is raacsan inta aanay istaaban. Ciddiise aan karin soonka, wuxuu quudin lixdan (60) miskiin. Arrintu waa sidaas, si aad Eebbe u rumaysaan iyo Rasuulkiisa. Taasina waa xuduuddii Ilaahay. Gaalose waxaa u sugnaaday cadaab kulul.

Aayadahani waxay ku soo degeen haweenay la odhan jiray Khawlo iyo ninkeedii Aws Binu Saamit oo ku yidhi: "Waxaad igala mid tahay hooyaday oo kale".

Markaasay nebiga (naxariis iyo nabadgelyo korkiisa Eebbe ha yeelee) u timid iyadoo sheegan, 'inay carruur badan leedahay, ay doonaysana in ninkeedii lagu celiyo'. Sidaasna ay nebiga (NINKHA) hadalka isku celceliyeen.

Ilaahay waa maqlaa, waana ajiibaa (aqbala) ducada qofka dhibban sida haweenaydaas Quraanku ku soo degay.

Dhaartaas la soo sheegay waa mid jaahiliintii ku dhaaran jireen, Muslimiintana way ka reebban tahay, waxaana ka waajibi kafaara gud (kafaaro gef, iska bixin).

Caa'isha waxay tidhi: "Mahad Eebbaa iska leh, wax walbana maqla. Waxaa timid haweeneydaas doodayday anigoo guriga dhinac ka mid ah jooga. Markaasaa Eebbe soo dejiyey aayadda". Waxaa weriyey Bukhaari.

Al-Mujaadalah (1-4).

5. Kuwa Eebbe iyo Rasuulkiisa khilaafayaa waxay mudan yihiin halaag, sidii loo halaagay kuwii ka horreeyey. Eebbana wuxuu soo dejiyey Aayado cad cad, gaalana waxaa u sugnaaday cadaab wax ihaaneeya.

6. Maalin buuna ihaanayn Ilaahay oo uu soo bixin dhammaantood, ugana warrami waxay camal faleen. Eebbana waa koobay, iyana waa hilmaameen. Ilaahayna wax kasta wuu daalacan (arkaa).

7. Ma og tahay in Ilaahay og yahay cirka iyo dhulka waxa ku jira. Saddexdii faqiba Ilaahay baa afreeya (ku afar ah), shantana Ilaahay baa lixeeya; waxa ka yar iyo waxa ka badanba Ilaahay baa la jooga meeshay ahaadaanba. Wuxuuna uga warrami waxay camal faleen Maalinta Qiyaame. Ilaahayna wax walba waa og yahay.
8. Miyaanad ogeyn kuwa laga reebay faqa xun, oo haddana ku noqon waxa laga reebay. Kuna faqi dembi iyo cadownimo iyo caasinnimada Rasuulka (NINKHA). Markay nebiga (NINKHA) u yimaaddaanna ku salaamaya waxaan Eebbe ku salaamin oo hoos u dhihi, 'Maa Eebbe nagu cadaabo waxaan ku hadlaynno?' Waxaa ku filan Jahannamo oo ay gelayaan, waana guri xun.
9. Kuwa rumeeyayoow, markaad faqaysaan ha ku faqina dembi, colnimo iyo caasinnimada Rasuulka ee ku faqa wanaag iyo dhawrsani. Eebbana ka yaaba, isagaa la isu soo kulmine.
10. Faqa xuni shaydaan buu ka yimaaddaa si uu u walbahaar geliyo kuwa xaqa rumeeyay; waxbase kama dhibo idan Ilaahay mooyee. Ilaahay uun ha talo saarteen kuwa xaqa rumeeyey.

Eebbe iyo Rasuulkiisa ciddii la colloowda halaag baa u dambeyn iyo cadaab daran, maxaayeelay Eebbe wax walba waa og yahay.

Waana in wanaag lagu faqo ee aan xumaan iyo colnimo lagu faqin, maxaa yeelay ruux kasta Eebbeheen waa la joogaa, waana daalacan. 'Isagaana loo noqon'. Cid kastana wuxuu ka abaal marin waxay kasbatay.

Nebiguna (naxariis iyo nabadgelyo Eebbe korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: "Hadday idin salaamaan Ehelu Kitaabku (gaaladu), dhaha 'Korkiinna ha ahaato'". Waa saxiix.

Al-Mujaadalah (5-10).

11. Kuwa xaqa rumeeyayoow haddii la idin yidhaahdo, "Isu waasiciya fadhiga"; isu waasiciya Ilaahay, wanaagga ha idiin waasiciyee. Marka la idin yidhaahdo, "Jihaadka iyo kheyrka u degdegana"; u degdega Ilaahay wuu kor yeelayaa kuwa xaqa rumeeya. Kuwa cilmiga lehna darajooyin ayuu kor yeelayaa. Eebbana waxa la camal fali waa og yahay.
12. Kuwa xaqa rumeeyayoow markaad nebiga (NINKHA) qaabilaysan, hor mariya sadaqo. Sidaas ayaa idiin kheyr badan, idiinna nadiifsan. Haddaydaan helaynin, Eebbe waa Dembi-dhaaf badane, Naxariis badan.
13. Ma waxaad ka cabsateen inaad hor marsataan sadaqooyin markaad nebiga (NINKHA) la kulmaysaan? Haddaydaan sidaas falin Eebbe waa idin ka toobbad aqbalay ee salaadda ooga, sekadana bixiya. Ilaahaay iyo Rasuulkiisana addeeca. Eebbana waa og yahay waxaad camal falaysaan.

Dadka xaqa rumeeyey waa in ay Ilaahay iyo nebigiisaba (naxariis iyo nabadgelyo korkiisa Eebbe ha yeelee) ay maqlaan. Dhexdoodana isu naxariistaan, jihaadka iyo kheyrkana u degdegaan.

Waxbarashada, salaadda, sekada iyo sadaqaddana ay ku dadaalaan si uu Eebbe abaal-gud fiican u siiyo.

Al-Mujaadalah (11-13).

14. Ma og tahay kuwii ka sokeeye dhigtay (yeeshay) kuwa Eebbe u cadhooday? Kuwaasi idin ka mid ma aha, iyagana ka mid ma aha (waa munaafiqiinta). Waxayna ku dhaaran been, iyagoo og.
15. Eebbe wuxuu u darbay kuwaas cadaab daran, maxaa yeelay wax xun bay falayeen.
16. Dhaartoodii bay gaashaan ka dhigteen, dadkana xaqii bay ka leexiyeen. Waxayna mudan yihiin cadaab wax ihaaneeya.
17. Xoolahooda iyo carruurtoodu wax ugama taraan Eebbe xaggiisa. Waana kuwo ehelu naar ah, wayna ku waari.

18. Maalinta Eebbe soo bixiyo dhammaantood, way u dhaaran Eebbe siday idinka idiinku dhaartaan, iyagoo u malayn inay wax (xujo ah) haystaan. Waase kuwo beenaaleyaal ah.
19. Waxaa ka qaalib noqday (duufsaday) shaydaan oo hilmaansiyeey xusidda Eebbe. Kuwaasi waa xisbiga shaydaanka. Xisbiga shaydaankuna waa kuwa khasaaray.

Munaafiqiintu waa colka kuwa xaqa rumeeyey. Waxayna had iyo jeer xidhiidh la yeeshaan gaalada kale; iyaga oo aan labada qolo midna ka tirsanayn! Kuwaasna Eebbe wuxuu ugu gooddiyey ciqaab daran. Waana beenaaleyaal, xisbiga shaydaanka ka mid ah, naar iyo khasaarena way la kulmi doonaan.

Al-Mujaadalah (14-19).

20. Kuwa Ilaahay iyo Rasuulkiisa khilaafayaa waxay ka mid noqon kuwa dullooba.
21. Eebbe wuxuu xugmiyey (xukumay) inuu adkaado isaga iyo Rasuulkiisu, maxaa yeelay waa Xoog badane, Adkaade ah.
22. Ma helaysid dad Ilaahay rumeeyey iyo Maalintii dambeysay, oo haddana jecel ruux Ilaahay iyo Rasuulkiisa khilaafaya; haba ahaadeen aabbayowgood, carruurtooda, walaalahood ama qaraabooda. Kuwaas (aan jeclaanin gaalada) waa kuwo qalbigooda iimaanka lagu dhigay, Eebena ku xoojiyey gargaarkiisa. Wuxuuna gelin jannooyin webiyaal dhex socdaan, ay kuna waari. Kuwaas Ilaahay baa ka raalli noqday, iyana way ka raalli noqdeen. Waana Xisbiga Ilaahay. Xisbiga Ilaahayna waa kuwa liibaanay.

Eebbe wuxuu ballan qaaday in dadka xaqa ku taagani adkaadaan markay wixii Eebbe faray yeelaan, xaq-diideyaashuna ay dulloobaan.

Jaceylka iyo walaalnimaduna waa inay ahaato xaqa dartiis ee aanay noqonin sukeeynimo (sokeeynimo) qaraabo. Kuwa ku walaalooba Eebbe dartiina waa xisbiga Ilaahay ee ay liibaani u dambeyn.

Rasuulkuna (Naxariis iyo nabadge iyo Eebbe korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: "Eebboow ha ugu yeelin faajir iyo faasiq gacan iyo nicmo agtayda".

Al-Mujaadalah (20-22).

--- *** ---

Aakhiro iyo Adduunkaba, Ilaahay ha ka abaal-mariyo dhammaan dadkii hawshan gacan ka geystay, waalidiintoodii iyo ciddii ka faa'iideysatoba. Aammiin.

Insha Allaah, jisas kalena waan soo diyaarin doonaa - ilaa soddonka jus oo idil - ee Ilaahay waqti iyo kheyraad ha ii sii kordhiyo. Aammiin.

Wixii talo, tusaale ama fikrad ah ee mashruucan ku saabsan, fadlan, u soo dir: eng-s-jama@hotmail.com.

Fadlan, sii gudbi si dadka afka Soomaaliga ku hadla oo idili uga faa'iideystaan!

Mahadsanid.